



Federal Republic of Somalia  
Office of the President

SHARCI LR. 41

TAARIKH: 31/12/2020

ANSIXINTA SHARCIGA HEY'ADDA DIIWWAANGELINTA IYO AQOONSIGA DADWEYNANA  
SOOMAALIYEED

MADAXWEYNAHA J.F.S,

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurks KMG

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka GSH/351/2/B-10/20  
taariikh 29/12/2020 kuna saabsan ansixinta Sharciga Hey'adda  
Diiwwaangelinta iyo Aqoonsiga Dadweynaha Soomaaliyeed

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday  
Sharciga Hey'adda Diiwwaangelinta iyo Aqoonsiga Dadweynaha Soomaaliyeed

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga  
ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

**MUQDISHO: 31/12/2020**



Madaxweynaha J. F.S  
Maxamed Cabdullaahi Maxamed "Farmaajo"



Somali Federal Republic  
The House of the People  
Office of the Speaker

Ref: SH/351/2/B-10/20 الرقم:

Mogadishu, December 29, 2020 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya  
Muqdisho.

Ujeeddo: Soo Gudbinta Hindise Sharciyedka Hay'adda Diiwaangelinta  
yo Aqoonsiga Dadweynaha Soomaaliyeed.

Mudane Madaxweyne,

Sida aad la socoto, Hindise Sharciyedka Hay'adda Diiwaangelinta iyo Aqoonsiga Dadweynaha Soomaaliyeed ee halkaan ku lifaaqan waxa soo gudbisay Wasaarada Arrimaha gudaha XFS.

Kadib waxaa ka baaraandagey oo habraacii loogu talogaly marsiiyay Guddiga Arrimaha gudaha ee Golaha Shacaka. Ugu dambayna Hindise Sharciyedka Hay'adda Diiwaangelinta iyo Aqoonsiga Dadweynaha Soomaaliyeed oo uu Golaha Shacabku ansixiyey Kalfadhiga 8aad Kulankiisa 3aad ee 02/11/2020, iyadoo ay goobjoog yihii Boqol Afartan iyo Saddex (143) Xildhibaan, waxaa oggol u codeysay Boqol Afartan iyo Saddex (143) xildhibaan, mana jirin xildhibaan diiday ama ka aamusay.

Hadaba M.ne Madaxweyne, Maadaama oo Aqalkii Sare Doorasho ku maqanyahay, waxaan si waafaqsan qodobka 90aad xarafka (q) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaliya kaaga codsanayaa inaad go aanka Golaha ku ogolaato xeer Madaxweyne, si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga al-

Naga guudoon salaan diiran iyo   
M.ne Mahad Abdalla Cawad  
Kusimaha Guddoomiyaha Golaha Shacabka



Og: R/   
Xukuumadda Federaalka Soomaaliya  
Muqdisho.

Og: Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamulada Gobolada iyo Amniga ee Golaha Shacabka.

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.

Tell: +252612224442 / +252-615577472


E-mail: [speaker@parliament.gov.so](mailto:speaker@parliament.gov.so)

Website: [www.parliament.gov.so](http://www.parliament.gov.so)

Ansixin Hindise Sharchiyeedka Hay'adda Diiwaangelinta  
iyo Aqoonsiga Dadweynaha Soomaaliyeed.

**Kusimaha Guddoomiyaha ahna Guddoomiye ku-xigeenka  
2aad-Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS**

Tirada Xubnaha Codeysay 143: Oggol: 143; Diiday: 0; Aamustay: 0;

  
Saxiix: M.ne Mahad Cabdalla Cawad

Taariikh: December 29, 2020

**Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Golaha Shacabka  
Baarlamaanka JFS**

Saxiix: M.ne Abdiweli Sh. Ibrahim Muudey

Taariikh: December 29, 2020

**Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS**

  
Saxiixa: Mudane Cabdikarim Xaaji Cabdi Buux

Taariikh: December 29, 2020



## **JUMHURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**HINDISE SHARCIYEEDKA HAY'ADDA  
DIIWAANGELINTA IYO AQOONSIGA  
DADWEYNAHA SOOMAALIYEED**

## Tusmo

<b>CUTUBKA KOOWAAD .....</b>	1
Qodobka 1aad: Magaca Sharciga.....	1
Qodobka 2aad: Eray-Bixin.....	1
Qodobka 3aad: Asaasid .....	2
Qodobka 4aad: Ujeeddooyinka Hey'adda.....	2
<b>CUTUBKA LABAAD: QAAB-DHISMEEDKA, HAWLAHA IYO AWOODAHA HAY'ADDA.....</b>	3
Qodobka 5aad: Hawlaha Hay'adda.....	3
Qodobka 6aad: Wadashaqeynta iyo Iskaashiga .....	4
Qodobka 7aad: Awoodaha Hay'adda .....	4
Qodobka 8aad:Awoodaha Wasaaradda.....	4
Qodobka 9aad: Qaab-dhismeedka Hay'adda .....	5
Qodobka 10aad: Maareeyaha Guud .....	5
Qodobka 11aad: Ku-xigeenka Maareeyaha Guud .....	5
Qodobka 12aad: Shuruudaha looga baahanyahay Maareeyaha Guud iyo Ku-xigeenka Maareeyaha Guud.....	5
Qodobka 13aad: Muddo-xileedka Maareeyaha Guud.....	6
Qodobka 14aad: Xil-Waayidda.....	6
Qodobka 15aad: Awoodaha Maareeyaha Guud .....	6
Qodobka 16aad: Awoodaha Ku-xigeenka Maareeyaha Guud .....	6
Qodobka 17aad: Agaasimeyaal Waaxeed .....	6
Qodobka 18aad: Shaqaalaha Hay'adda.....	7
Qodobka 19aad: Dhaarta Xafiiska.....	7
Qodobka 20aad: Miisaaniyadda Hay'adda .....	7
<b>CUTUBKA SADDEXAAD: QODOBBO QUBANE AH .....</b>	8

Qodobka 21aad: Awoodda Soo-saarista Xeer-nidaamiyeyaal.....	8
Qodobka 22aad: Burin.....	8
Qodobka 23aad: Dhaqangal .....	8

Sharci Lr: \_\_\_\_\_ ee \_\_\_\_\_

## Hay'adda Diiwaagelinta iyo Aqoonsiga Dadweynaha Soomaaliyed

### CUTUBKA KOOWAAD

**Qodobka 1aad:**

**Magaca Sharciga**

Sharacigan waxaa hadda ka dib, loogu yeeraya "Sharciga Dhismaha Hay'adda Diiwaan-gelinta iyo iyo Aqoonsiga Dadweynaha Soomaaliyed".

**Qodobka 2aad:**

**Eray-Bixin**

Marka Sharcigan laga hadlayo, ereyada hoos ku qoran mid waliba wuxuu leeyahay macnaha ku hor qoran, sida:

1. "**Sugid**" waxaa loola jeedaa hab lagu xaqiijinayo in qofku yahay ruuxa uu sheeganayo;
2. "**Hay'adda**" waxaa loola jeedaa Hay'adda Diiwaan-gelinta Aqoonsiga ee Qaranka ee lagu asaasay Qodobka saddexaad ee Sharcigan;
3. "**Xog-dhalyada**" (*biometric*) waxaa loola jeedaa tilmaamaha la xiriira waxyaabaha u goonida ah qofka ee ka turjumaya qaybo ka mid ah qofka jirkiisa sida faraha, midabka indhaha, muuqaalka wejiga;
4. "**Aqoonsi dhalasho**" waxaa loola jeedaa caddaynta la siiyo qofka ku dhasha Soomaaliya;
5. "**Golaha Wasiirrada**" waxaa loola jeeda hay'adda ugu sarraysa Laanta Fulinta ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, laguna faahfaahiyey Qodobka 97aad ee Dastuurka ku-meel gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
6. "**Xarunta xog-kaydinta**" waxaa loola jeedaa barta lagu uruurinayo xogta ay Hay'addu ururiso;
7. "**Caddayn geeri**" waxaa loola jeedaa caddaynta qeexeysa qofka ku geeriyyoda Soomaaliya;
8. "**Maareeye Guud**" waxaa loola jeedaa Maareeyaha Guud ee Hay'adda Diiwaan-gelinta iyo Aqoonsiga Dadweynaha Soomaaliyed;
9. "**Tixraac qoys**" waxaa loola jeedaa xiriirka ka dhixeeya xubnaha qoys la diiwaan-geliyey sida waalidka iyo carruurtooda;
10. "**Habka aqoonsashada asaasiga**" waxaa loola jeedaa hab wax lagu aqoonsanayo oo loo abuuray inuu dadka u fidiyo aqoonsasho iyo aqoonsi loo adeegsado maamulka iyo macaamilaadka guud iyo kuwa gaarka ah, adeegyada iyo aqoonsiyada kuwaas ka yimaada;
11. "**Xukuumad**" waxaa loola jeedaa Xukuumadda Federaalka ee Soomaaliya;
12. "**Aqoonsasho**" waxaa loola jeedaa hannaanka lagu hubinayo, lagu aqoonsanyo ama

- lagaga go'aan-gaarayo qofka uu yahay;
13. “**Kaar-aqoonsi**” waxaa loola jeedaa kaarka aqoonsiga Qaranka ee ay Hay'addu si midaysan uga bixiso dalka oo dhan;
  14. “**Aqoonsi guur**” waxaa loola jeedaa caddaynta la siiyo labada qof ee isku guursada si waafaqsan Shareecada;
  15. “**Wasiirka**” waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta;
  16. “**Wasaaradda**” waxaa loola jeedaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta;
  17. “**Xog-horaadda**” waxaa loola jeedaa macluumaadka laga diiwan-gelinayo qof walba sida magaca qofka, magaca aabbaha, magaca hooyada iyo taariikhda dhalashada;
  18. “**Diiwaan-gelin**” waxaa loola jeedaa xogta qofka oo lagu diiwaan-geliyo si nidaamka waafaqsan;
  19. “**Nidaam**” waxaa loola jeedaa habka aqoonsashada asaasiga ah;
  20. “**Tirsi aqoonsasho oo gooni ah**” waxaa loola jeeda tiro qofka tilmaan soocaysa inta uu nool yahay iyo marka uu dhinto ka dib.

#### **Qodobka 3aad:**

##### **Asaasid**

1. Waxaa Sharcigan lagu asaasay “Hay'adda Diiwaan-gelinta iyo Aqoonsiga Dadweynaha Soomaaliyeed”.
2. Hay'addu waa mid madaxbannaan oo leh shakhsiyad qaunuuni ah.
3. Xarunta Dhexe ee Hay'addu waa caasimadda Soomaaliya ee Muqdisho, waxayna laamo ku yeelan doontaa hadba meesha iyo sida loogu baahdo.
4. Hay'addu waxay yeelanaysaa astaan, taasoo ah astaanta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee ku xusan Qodobka 6aad Faqradda 2aad ee Dastuurka ku-meel-gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; astaan taasoo:
  - a. Labada gees ayka xigaan labo geed oo sabuul ah oo midabkoodu yahay buluug;
  - b. Uu hoos kaga yaal qoraal muujinaya magaca Hay'adda oo loo soo gaabiyay DADSOM, kuna qoran far waaweyn calaamad buluug ah iyo labo waran oo dhinacyada ka xiga.

#### **Qodobka 4aad:**

##### **Ujeeddooyinka Hey'adda**

Ujeeddooyinka loo asaasay Hey'adda waxaa ka mid ah:

1. In muwaaddiniinta iyo dadka sida sharciga ah ugu nool Soomaaliya ay noqdaan dad la aqoonsan karo oo dukumiintiga aqoonsiga ay sitaan iyo tirsiga aqoonsi ee u goonida ah uu noqdo mid sahlaya adeegyada loo fidinayo;
2. Inay xoojiso isku-dubbaridka iyo wax-wada-qabadka shaqooyinka hay'adaha

Dawladda iyo kuwa gaar ahaaneed ee bixiya adeegyada ay aqoonsashada qofku muhiimka u tahay iyo iskugu xirid adeegyada dowladda qaab elektaroonik ah (e-governance);

3. In ay abuurto, heysana xog-dhigaalka guud ee Dalka, kaas oo keydiya dhammaan xogaha dadweynaha iyo dhammaan diiwaannada adeegyada kale ee dalka.
4. Inay gacan ka geysato koboca dhaqaalaha Qaranka, horumarinta fursado dhaqaale, ka-hortagid is-dulbuurad dhanka adeeg-bixinta iyo ku-xadgudub xuquuqaha aadmaiga oo sababi karta aqoonsasho la'aan.

### **CUTUBKA LABAAD:**

#### **QAAB-DHISMEEDKA, HAWLAHA IYO AWOODAHA HAY'ADDA**

**Qodobka 5aad:**

**Hawlaha Hay'adda**

Hay'addu waxay qabanaysaa hawlahan soo socda:

1. Inay abuurto, ka shaqaysiiso, maamusho oo ay dhawrto nidaam maarayn aqoonsi oo asaasi ah, si ay u suurta- gasho in qof kasta oo muwaaddin ah ama si sharci ah ugu nool Soomaaliya la diwaan-geliyo;
2. In mawaaddiniinta iyo cid kasta oo si sharci ah dalka ugu nool ay ku diwaan-geliso nidaamka, ayna siiso tirsi-aqoonsi oo u gooni ah oo lagu aqoonsan karo;
3. In ay bixiso kaar-aqoonsi ee heer qaran;
4. In ay mas'uul ka tahay barnaamijyo lagu hormaarinayo adeegyada la xiriira diiwaangelinta iyo keydinta xogta madaniga ah ee dhacdooyinka muhimka ah sida, dhalashada, geerida, guurka, furriinka, kuwaasoo aasaas u ah qaadashada dokumentiyada qaranka. Si loo helo xogtaas oo mideysan, Hay'addu waxay Gobollada iyo Degmooyinka dalka ka diyaarineysaa tababarro iyo barnaamijyo lagu hormarinayo adeegyadaa;
5. Inay shakhsiyadka siiso xogta la xiriira xaaladdooda diiwaan-gelineed;
6. In ay hubiso dhawrsoonaanta xog-dhalyada iyo xog-horaadda shakhsiyadka ee ay Hay'addu ururisay, una maarayso si xilkasnimo leh oo waafaqsan Sharciga;
7. In ay qaab elektaroonik ah (e-government) isugu xirto xarunta xog-dhigaalka iyo hay'adaha Dawladda iyo kuwa aan dawliga ahayn ee bixiya adeegyada uu aqoonsigu muhiimka u yahay, taas oo loo marayo habraacyo;
8. Inay cilmi-baaris ku samayso sida ugu waxtarka roon iyo waxyabaha guud ee ku soo kordha sida loo maareeyo aqoonsiyada hay'adaha kale ee Dawladda iyo kuwa aan dawliga ahayn, isla markaasna ay la wadaagto xogta ama waayo'aragnimada la xidhiidha aqoonsashada;
9. Inay si wax-ku-ool ah isugu duwdo, tayo ahaanna u dhisto laamaha ay Hay'addu ka furato dalka;
10. Inay sare u qaaddo adeegsiga nidaamka maaraynta aqoonsiga ee asaasiga ah, si loo hormariyo mudnaanshaha siyaasadda, dhaqaale, bulsho iyo amni ee dalka; iyo

**11.** Inay fuliso, hadba inta sharcigu u oggolanaayo, wixii hawl kale ah oo muhiim u ah ama ku habboon gudashada waajibaadkeeda.

**Qodobka 6aad:**  
**Wadashaqeynta iyo Iskaashiga**

1. Hirgelinta sharcigan waxay Hay'addu iskaashi kala yeelanaysaa Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha kale ee Dawladda.
2. Dhammaan Hay'adaha gaarka loo leeyahay, waxaa waajib ku ah in ay Hay'adda kala shaqeeyaan fulinta howlaheeda si waafaqsan sharcigan.
3. Dhammaan muwaaddiniinta Soomaaliya iyo cid walba oo si sharci ah ku joogta dalka, waxaa waajib ku ah in qof waliba isdiiwan-geliyo, si uu u helo tarsi gooni u ah.

**Qodobka 7aad:**  
**Awoodaha Hay'adda**

1. Hay'addu, iyadoo aan dhaafayn seeraha Sharcigu xadeeyey, waxay awood u leedahay wax kasta oo daruuri u ah ama ku habboon sidii ay u gudan lahayd howlaheeda.
2. Iyadoon la xadayneyn sida guud ee faqradda hore u dhigan tahay iyo awoodaha ka ratibmaya in Hay'addu leedahay shakhsiyad qaunuuni ah, Hay'addu waxay si gaar ah awood uguleedahay:
  - a. In ay dacwad soo oogi karto, laguna soo oogi karo;
  - b. In ay geli karto heshiisyada la xiriira shaqadeeda;
  - c. Inay iibsan karto, haysan karto ama iska iibin karto hantideeda si waafaqsan Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka;
  - d. Inay amaahato qaddar lacag ah oo Dawladdu u oggolaato si waafaqsan Sharciga Maamulka Maaliyadda;
  - e. Inay qaadato wixii qalab ama dhaqaale ah ee loogu deeqo, Dastuurkuna u oggol yahay;
  - f. In iyadoo raacaysa Sharciga Shaqaalaha Rayidka lagu maamulo ay qorato, shaqadana ka eryi karto shaqaalaheeda;
  - g. In ujuurooyinka adeegyada ay bixiso Hay'adda lagu soo saarayo Sharci uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

**Qodobka 8aad:**  
**Awoodaha Wasaaradda**

Awoodaha ay Wasaaraddu ku leedahay Hay'adda waa sida soo socota:

1. Kormeerridda Hay'adda;
2. Metelaadda Hay'adda ee Golaha Wasiirrada iyo Goleyaasha Baarlamaankaba.

**Qodobka 9aad:**  
**Qaab-dhismeedka Hay'adda**

1. Hay'addu waxay yeelanaysaa:
  - a. Maareeye Guud;
  - b. Maareeye Ku-xigeen Guud;
  - c. Agaasime waaxeedyo; iyo
  - d. Shaqaale.
2. Qaab-dhismeedka Hay'adda, wixii aan lagu sheegin Sharcigan dhexdiisa, waxaa Xeer-nidaamiye ku soo saaraya Maareeyaha Guud.

**Qodobka 10aad:**  
**Maareeyaha Guud**

1. Hay'addu waxay yeelanaysaa maareeye Guud.
2. Maareeyaha Guud waxaa soo jeedinaya Wasiirka Wasaaradda Ariimaha Gudaha, waxaan meel marinaya Golaha Wasiirada, kadibna waxaa Xeer Madaxweyne ku soo magacaabaya Madaxweynaha JFS sida ku xusan Qodobka 90aad, Xarafkiisa (K) iyo Qodobbada 99aad iyo 102aad ee Dastuurka, isla markaasna waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda JFS.
3. Xil-ka-qadista Maareeyaha Guud waxaa loo marayaa isla-habkaas ku xusan faqradan hore.

**Qodobka 11aad:**  
**Ku-xigeenk Maareeyaha Guud**

1. Hay'addu waxay yeelanaysaa Ku-Xigeenk Maareeyaha Guud, habraaca magaabistiisana waxaa soo jeedinaya Wasiirka Wasaaradda Ariimaha Gudaha, waxaan meel marinaya Golaha Wasiirada, kadibna waxaa Xeer Madaxweyne ku soo saaraya Madaxweynaha JFS sida ku xusan qodobka 90aad, Xarafkiisa (K) iyo qodobbada 99aad iyo 102aad ee Dastuurka, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda JFS.
2. Xil-ka-qadista Ku-Xigeenk Maareeyaha Guud waxaa loo marayaa isla habraaca ku xusan faqradda kore.

**Qodobka 12aad:**  
**Shuruudaha looga baahanyahay Maareeyaha Guud iyo**  
**Ku-xigeenk Maareeyaha Guud**

Qofka loo magacaabayo Maareeyaha Guud iyo Ku-xigeenkisa waa in laga helaa shuruudahan soo socda:

1. Inuu yahay muwaaddin Soomaaliyed oo Muslim ah;
2. In dhimirkiisu fayow yahay;
3. In da'diisu aanay ka yarayn 30 sano;

4. Inuu haysto shahaado heer-jaamacadeed;
5. Inuu leeyahay waayo aragnimo shaqo oo aan ka yarayn (5) sano, khibradna u leeyahay maamulka iyo maaraynta;
6. In aan lagu xukumin dembiyo waaweyn;

**Qodobka 13aad:**

**Muddo-xileedka Maareeyaha Guud**

Muddo-xileedka Maareeyaha Guud iyo Ku-xigeenkiisa waa Shan (5) sano oo hal mar la cusboonaysiin karo.

**Qodobka 14aad:**

**Xil-Waayidda**

Maareeyaha Guud iyo ku-xigeenkiisa xilka waxay ku weyn karaan:

1. Xanuun xagga dhimirka ah uu soo caddeyo dhakhtar lagu kalsoon yahay;
2. Geeri;
3. Xil-gudasho la'aan si waafaqsan habraacyada waajibaadka shaqo ee Hay'adda.
4. Dembi-ciqaabeed ay soo caddeysay maxkamadda awooddha u leh; iyo
5. Iscasilaad laga aqbalay;

**Qodobka 15aad:**

**Awoodaha Maareeyaha Guud**

Awoodaha Maareeyaha Guud waa sida soo socota:

1. Dejinta, la socodka, hirgelinta iyo kormeerka qorshaha shaqo ee Hay'adda ;
2. Diyaarinta qaab-dhismeedka iyo habraacyada lagu socodsiinayo hawlahaa Hay'adda;
3. Diyaarinta miisaaniyad-sanadeedka Hay'adda;
4. Xil-ka-qaadista shaqaalaha Hey'adda si waafaqsan Sharciga;
5. Matalaadda Hay'adda dhinaca Sharciga iyo gelista heshiisyada.

**Qodobka 16aad:**

**Awoodaha Ku-xigeenka Maareeyaha Guud**

Ku-xigeenka Maareeyaha guud wuxuu u xil saran yahay:

1. Matalista Maareeyaha Guud marka uu shaqada ka maqan yahay; iyo
2. Qabashada wixii hawl kale ee Maareeyaha Guud si gaar ah ugu xilsaaro.

**Qodobka 17aad:**

**Agaasimeyaal Waaxeed**

1. Hay'addu waxay yeelanaysaa Agaasimeyaal Waaxeed;
2. Hay'addu waxay kaloo yeelanaysaa laamo iyo faracyo ka hirgeliya hawlaheeda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

**Qodobka 18aad:**  
**Shaqaalaha Hay'adda**

1. Hay'addu waxay yeelanaysaa shaqaale fuliya hawlaha Hay'adda.
2. Shaqaalaha Hay'adda waxaa qoraya Maareeyaha Guud, isagoo raacaya habraaca Sharciga shaqaalaha rayidka ee dowladda.

**Qodobka 19aad:**  
**Dhaarta Xafiiska**

1. Xog-dhigista waa in ay taallaa xarumaha Hay'adda ee dalka gudihiisa ah, waxaana ka reeban in lagu hayo ama la geeyo meel ka baxsan xarumaha rasmiga ah ee Hay'adda, dadka gacanta ku hayaana waa in ay yihiin dad Soomaali ah oo la dhaariyey, lagana saxiixay qoraal.
2. Shaqaalaha Hay'adda ee u xilsaaran maamulka xogta inta aysan billaabin shaqada loo igmadey waa in ay Maareeyaha Guud hortiisa ku maraan dhaarta ilaalinta xogta dhawrista u baahan ee Hey'adda, waana in laga saxiixaa heshiis xog-ilaalineed, loona caddeeyaa cawaaqibta ka dhalan karta bixinta xogta dadweynaha.
3. Dhaarta lagu xusay faqrada hore ee qodobkan ma beddeleyso dhaar kale oo Sharcigu ku waajibiyoo shaqaalaha.
4. Waajibaadkii ay dhaartu saartay qofka shaqaalaha ka ah Hay'adda, kama dulqaadeyso xitaa haddii uu shaqada uga tago hawlgab awgeed ama sabab kasta oo kale.
5. Habraaca dhaarta iyo xog-ilaalinta la xiriira waxaa si faahfaahsan loguu soo saari doonaa Xeer-nidaamiye Hay'adda.

**Qodobka 20aad:**  
**Miisaaniyadda Hay'adda**

Hay'addu waxay yeelanaysaa misaaniyad u gaar ah oo ka imanaysa:

1. Miisaaniyadda guud ee Dawladda Federaalka Soomaaliya;
2. Dakhliga laga helo adeegyada ay Hay'addu fuliso waxaa loo marayaa si waafaqsan habraaca Sharciga maamulka maaliyadda ee Dowladda Federaalka Soomaaliya;
3. Kaalmada miisaaniyadeed ee laga helo deeq- bixiyeyaasha gudaha iyo dibadda si waafaqsan habraac maaliyadeedka Dawladda.
4. Maareeyaha Guud ee Hey'adda waa in uu sanad walba ugu dambeyn 30<sup>ka</sup> Oktoobar uu diyaariyaa qorshaha Miisaaniyad-sanadeedka Hay'adda, taasoo muujineysa dhammaan kharashka iyo dakhliga ee la filayo, una gudbiyo Wasaaradda Maaliyadda ee XFS.

**CUTUBKA SADDEXAAD:  
QODOBBO QUBANE AH**

**Qodobka 21aad:**

**Awoodda Soo-saarista Xeer-nidaamiyeyaal**

Hay'adda waxay awood u leedahay inay soo saarto Xeer-nidaamiye faahfaahinaya qodobbada sharcigan.

**Qodobka 22aad:**

**Burin**

Sharci kasta oo ka hor imaanaya qodobbada Sharcigan waa la buriyay.

**Qodobka 23aad:**

**Dhaqangal**

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa markuu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, uuna saxiixo Madaxweynaha JFS, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.